

Xaflad soo dhaweyn ee ka dhacday wilaayadda Michigan, USA.

Detroit, MI - Waxay jaaliyadda Somaaliyeed ee ku nool Michigan u sameeyeen xaflad soo dhaweyn ah ee loo sameeyey waiirku xigeenka dakadaha iyo khyradka badda ee Dowlad Gobolledka Puntland ee ka mid ahaa wafdigii beryahaan booqashada ku marayey North America ee uu hogaaminaayey Dr. Maxamed Cali Yuusuf (Gaagaab). Xafladaas waxay ka dhacday qolka shirarka ee hoteelka Comfort Inn & Suites ee Ann Arbor, Michigan.

Waxaa Xafladda ka soo qayb galay Soomaali badan oo daneynaayey inay ogaadaan akhbaarta dalkooda. Soomaalidu waxaa ay ka kala yimaadeen nawaaxiga magoolinka Ann Arbor, Ypsilanti, Detroit Metropolitan area iyo illaa Windsor Kanada.

Ka dib markii lagu furay ayado Quraan ah Mas'uuliyiinta Jaalliyadda ayaa ku soo dhoweeyey mudane Abdulwali oo halkaas ka soo jeediyey warbixin dheer oo taabanaysay xaaladda dalka manta marayo iyo isbedelka ka iyo horumarka Dowlad Gobolledka Puntland siiba dhaqaalaha, waxbarashada, isgaarsiinta, kheyraadka badda, barigaba iyo qodobo kale ee jaaliyadda markaas ay xiiseynayeen. Shirkaas waxaa lagu soo gabagabeeeyey su'aalo, taloojin, iyo xogwareysi dhex maray wafdigii iyo jaaliyadda Soomaaliyeed ee madashaas joogtay.



Waxaa soo tebiyey: **c/shakur A Geyre** | Email: cshakur3@yahoo.com

Faafin: www.SomaliTalk.com | Aug 29, 2006